



Tixraac:XRW/ 310 /06/2021

Tariikh:19/06/2021

Ujeedo: Magacaabidda Guddiga Maamulaya Doorashada Xildhibaanada Banaadiriga

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

Markuu Arkay: Qodobbada 99-aad iyo 100-aad ee Dastuurka Ku-Meel-Gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya,

Markuu Arkay: Habraaca soo jireenka ah ee lagu soo xuli jiray Xildhibaanada matala Qabiilada Banaadiriga

Markuu Arkay: Magacaabiddii xubnaha ay soo magacaabeen Madaxda Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka.

Markuu Tixgeliyey: Mudnaanta ay leedahay Qabashada Doorashada Hay'adaha Dastuuriga ah si waafaqsan Dastuurka KMG iyo Heshiiska Qaran ee ay wada saxiixeen Madaxda Qaranka.

Oodobka 1aad
Magacaabid

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, wuxuu dib u magacaabay Xubnaha Maamulaya Doorashada Xubnaha Xildhibaanada Banaadiriga ee lagu qabanayo Gobolka Banaadir, markii dib-u-eegis lagu sameeyey, ka dib heshiiskii 27 May,2021, ay wada gaareen Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Fedraalka, kuwaasoo kala ah;

1. Sacdiyo Aweys Cali Boolaay
2. Cabdullaahi Xasan Maxamed
3. Ibraahim Maxmed Cumar
4. Maye Cumar Cali
5. Nadiir Shariif Mashhuur
6. Saciid Cabdulqaadir Axmed
7. Maymuun Maxamed Muumin
8. Maxamed Xaaji Maye
9. Cabdalla Cumar Saalax
10. Maxamed Cabdixamiid Axmed
11. Rasha Cumar Sh. Abuukar

26/6/21
1

Qodobka 2aad
Deegaanka Doorashada

- B. Doorashada Xildhibaanda Banaadiriga waxaa lagu qabanayaa Magaalada Muqdisho, waxaana Maamulaya Guddiga ku xusan Qodobka 1aad.
- T. Guddiga ku xusan Qodobka 1aad waxa uu Maamulayaa kaliya Doorashada Xildhibaanada Banaadiriga qeybta lagu dooranayo Muqdisho.

Qodobka 3aad
Dhaqan-galka Magacaabidda

Magacaabiddani waxa ay dhaqan-galaysaa isla marka uu saxiixo Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda JFS.

Fulin Wacan.



Mudane: Maxamed Xuseen Rooble
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada JFS